

# Hagaha go'aanta maareynta geedaha Ash



## Halkan ka bilow: Samee liiska dhammaan geedahaaga ash.

- immisa geed oo ash ah ayaad leedahay?
- Halkee ayay ku yaaliin?



### Go'aami haddii geedahaaga Ash ay mudan yihiin in la badbaadiyo

- Ma yihiin kuwo caafimaad qaba?
- Miyay ugu yaraan yihiin 30 inji oo wareeg ah (10 inji oo dhexroor ah) dherer gaaraya xabadka?
- Miyay yar yihiin ama maba lahan miyaa calaamado inuu galay cayayaanka Ash?
- Meel fiican ma ku yaaliin?
- Wax qiima ah makuu leeyihiin adiga?


Go'aanso: Ma xiisaynaysaa inaad badbaadiso geedahaaga Ash?

Haa

Maya

Maya

Ma garanayi



### La soco una samee qorshe

- Geedaha ash ayaa aakhirka waxaa gali doona cayayaan waxuuna u baahan doonaa in meesha laga saaro
- Ka fiiri mar kasta calaamadaha cayayaanka gala geedaha oo samee qorshe aad geedahaaga ku bixinayso
- Tixgeli inaad beerato geed ama laba si aad u beddesho mid kasta oo aad siibto. Ku abuur geedka saxda ah goobta, kuna beer noocyo geedo kala duwan ah.

Haa

### La shaqee qof daryeelka geedaha shahaado u haysta si aad u daaweyso geedahaaga

- Hel khabiir geedaha shahaado u haysta si uu kuug duro sunta emamectin benzoate jirrida geedaha (magaca waa Tree-age).
- Daawee geedaha labadii sanaba mar inta lagu jiro dhamaadka gu'ga.
- Caadiyan kharashku waa \$200 ilaa \$300 geedkiiba, iyadoo ku xidhan inta uu la egyahay geedka



### Kirayso xirfadle daryeela geedaha

- Shaqaalaysii khabiirka geedaha oo ay aqoonsan tahay ISA. Khabiirka geedaha ayaa kaa caawin kara qiimaynta, daawaynta, siibida, iyo dib u beerashada geedaha. Ka raadso khabiir geedo oo kuu dhow bart [treesaregood.org](http://treesaregood.org).
- Hubi inaad ka hesho qiimeyn ugu yaraan laba meelood oo kala duwan.
- Waydii tixraacyo iyo cadayn caymis.
- Talo: La kaasho deriskaaga si aad u heshaan qiimo dhimis markaad si wadajir ah u daryeelaysaan dhammaan geedahiina.

# Aqoonsashada geedaha Ash

Ka fiiri sifooyinka soo socda si aad u go'aamiso haddii geedkaagu yahay geed ash ah:



Laamuhu waxay u baxaan laba jiho oo iska soo horjeeda.



Caleemo balaadhan ama caleemo badan oo ku yaalo hal jirid.



Jilif leh qaabka dhaayamoonka



Iniin u eg badeelo oo sida caadiga ah u wada koraan kooxo.

## Cabbirida geedahaaga

Ka cabbir masaafada ay isku jirto jiridda qiyaastii 4.5 fiit meel u jirto dhulka, ama dherer la siman xabadka. Tani waxay ku siinaysaa cabbirka wareegga. Si aad u hesho dhexroorka, u qaybi cabbirka wareegga 3.




*Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay*

*Maalgelinta uu bixiyo sharciga dhimista sicir bararka iyo USDA Forest Service*

34-412-1250-24 Somali

# Calaamadaha in geedku uu qabo cayayaan

Calaamadaha soo socdaa waxay muujin karaan in geedka ash ay ku jiraan cayayaan



Caleemaha ku yaala qaybta kore ama qayb ka mid ah geedka waxay bilaabaan inay dhintaan.



Laama cusub oo ka soo baxa geedka guntiisa waxay la macno tahay inay ku jirto cadaadis.



Shimbiraha badan oo ku geedaha xoqa ayaa geedaha xoqaya, qaybo ka mid ah jiliftuna waa la la'yahay.



Magadka waaweyn ee kasoo baxaya geedka waxay samaystaan godad leh qaabka D oo ay ka soo baxaan.



Cayayaanka yaryar ee cuna geedka gudhiisa ayaa ku sameeya xariijimo mawjad ah qolofa geedka.

Hennepin County  
Environment and Energy  
trees@hennepin.us  
hennepin.us/ashtrees

